

SAN DIEGO CITY SCHOOLS  
Xafiiska Madaxa Waxbarashadda Guud  
Qeybta Imtixaanaadka

**WAALIDIINTU WAXYAABAHA INAY IMTIXAANKA KA OGAADAAN LOOGA BAAHAN YAHAY**

**Habeenimada Imtixaanka ka horeeya**

1. Habeenimada imtixaanka ka horeeya waa inaad habsataa inuu ilmuhu hurdo ku filan seexday.
2. Waa in ilmaha laga ilaaliya wixii dhibaato ah inta uusan imtixaanka gelin, si aysan hurdada uga qasin.
3. Waa inaad ilmahaaga u sheegtaa inaad og tahay in imtixaanku adkaan karo, laakiin ay fursad u tahay uu ku soo bandhigo waxyaabaha uu garan karo.
4. Dhiirigeli – waa inaad ilmaha u sheegtaa inaad og tahay inuu si wanaagsan imtixaanka uga shaqeyn doono.
5. Waa inaad ilmaha la ciyaartaa ciyaaraha waxbarashadda ku saabsan sida waxyaabaha la isla raadraadineyo si uu imtixaanka niyad ugu hayo.

**Subxnimada Imtixaanka**

1. Waa in ilmaha wakhti hore la toosiyaa si uusan qarbo qarbo ugu bixin.
2. Ilmuhu subaxa uu imtixaanka galayo waa in qucaac wanaagsan la siiyaa.
3. Ilmaha waa in dhar u jecelyahay loo xidhaa.
4. Marka aad ilmaha dugsiga u direysid waa inaad niyad wanaagsan u muujisaa.
5. Waa inaad habsataa inuu ilmuhu dugsiga tegay maalinta imtixaanka la qaadeyo

**Imtixaanka kedib**

1. Waa inaad abaalmarin ku siisaa dadaalka uu imtixaanka ku sameeyey.
2. Waxaad ilmaha kala sheekeysataa waxyaabaha uu imtixaanka ka soo faa'iideystay.
3. Waxaad ilmaha kala sheekeysataa waxyaabaha la qaban karo hada iyo imtixaanka soo socda si uu u hagaajiyo.
4. Marka aad natiijooyinka imtixaanada ilmahaaga heshid:
  - a. Ilmuhu sida uu imtixaanka ku ahaa barbardhig ha kula sameyn walaaladii ama saaxiibkii.
  - b. Ilmahaaga ku ammaan meelaha uu ku wanaagsanaa.
  - c. Waxaa ilmahaaga kala hadashaa meelaha u baahan inuu hagaajiyo iyo siyaabaha ay qoysku uga caawin karaan si loo hagaajiyo..
5. Waxaad adiga ama ilmahaaga kala hadashaan macallinka ilmahaaga wixii su'aalo ah ee ku saabsan imtixaanka iyo natiijooyinka.